| Nebraska Medicine<br>**Buugga Siyaasadaha iyo Hababka**<br><br>☒ Siistemka ☐ Waaxda<br><br>**Wuxuu ka dambeyaa:** | Qeybta: MAALIYADDA (FN)<br>Mowduuca : Kaalmada Maaliyadda<br>Nambarka: FN15<br>Lifaaqyada: Lifaaqa A Miisaanka Daryeelka Sadaqada<br>Lifaaqa B Foomka Kashifaadda Maaliyadda<br>Lifaaqa C Warqadda Go'aanka<br>Lifaaqa D Warqadda Codsiga Macluumaadka<br>Lifaaqa E Xisaabta Guud Ahaan La Soo Dallaco<br>Lifaaqa F Soo Koobidda Luqadda<br>Taariikhda La Hirgeliyay: 3/22/02<br>Taariikhda La Fiiriyay: 03/24/03, 7/14/04, 7/1/05, 5/15/07, 01/29/09, 11/17/10 , 03/17/11, 03/19/12, 12/20/13, 04/08/16, 05/16/2016 |
|---|---|

**KAALMADA MAALIYADDA**

## I. Wararkii Hore:

Nebraska Medical Center iyo Bellevue Medical Center ururo samafal oo laga dhaafay bixinta canshuurta sida hoos timaada macnaha 501(c)(3) Xeerka Dakhliga Gudaha (Internal Revenue Code) iyo hay'adaha samafalka hoos yimaada sharciga.

## II. Ujeedada:

Si loo taageero himiladena in aan dunida ku hoggaamino isbaddalka nolosha si mustaqbal caafimaad qaba loogu abuuro dhamaan dadka iyo bulshadaha loo adeegsado barnaamijyada aqoonta kowaad, cilmi baarista cusboon iyo daaryeelka bukaanka aan caadiga ahayn, Nebraska Medicine waxay kaalmada maaliyadda siisaa kuwa u baahan.

Siyaasaddaan waxay soo taxdaa tilmaamaha Adeegyada Maaliyadda Bukaanka iyo la-talliyeyaasha maaliyadda Helitaanka Bukaanka waxay isticmaali doonaan si loo hubsado in la dhamaystiray daba gal ku filan oo ku habboon si bukaanka xaq u yeesho u helaan kaalmada maaliyadda. Adeegyada Maaliyadda Bukaanka (Patient Financial Services) iyo la-talliyeyaasha maaliyadda Helitaanka Bukaanka (Patient Access) waxay la shaqeyn doonaan bukaanka si loo xalliyo lacag bixinta marka la heli karo. Siyaasaddaan waxaa loo qoray si loo suggo siistem xaq ah oo dhamaystiran oo lagu qeybiyo kaalmada maaliyadda la siiyo bukaanka culeyska ka saaran yahay maaliyadda, gudaha ilaha la heli karo ee Nebraska Medicine, hab aan takoorin sida ku saleysan isirka, caqiidada, midabka, kacsiga, asal qaran, diinta ama da'da. Kaalmada maaliyadda Nebraska Medicine waxaa ka mid ah adeegyada ay bixiyaan Nebraska Medical Center, Bellevue Medical Center iyo Takhaatiirta UNMC.

## III. Siyaasadda

A. Waa la heli karaa kaalmada maaliyadda marka laga daalo dhamaan ilaha kale.

B. Dhimista kaalmada maaliyadda waxaa hela bukaanka aan ceymis lahayn, iyo waxaa lagu dabaqaa kharashka guud ee harray, kaddib marka la siiyo dhimista qofka iska bixiyo.

C. Dhimista kaalmada maaliyadda waxaa hela bukaanka qaba ceymiska baaqiga ku harray bukaanka.

D. Kaalmada Maaliyadda waxaa la siiyaa bukaanka muujiyay in aysan awood u lahayn in ay la kulmaan waajibka maaliyadda ka saaran Nebraska Medicine.

E. Kaalmada Maaliyadda looma ogolaan doono hababka xulashada iyo/ama qurxinta.

F. Waxaa dhici karto in la ogolaado kaalmada maaliyadda marka arrinta ku saabsan tahay daryeelka musiibada sida ku sifeysan IV B1 hoos.

G. Dhamaan gelinta, qalabka kaalmada xidididka (VAD), wadnaha farsamada (TAH) iyo farsamada mindhicirka (IRP) waa in ay la kulmaan La-Talliyaha Maaliyadda Gelinta (Transplant Financial Counselor) si loo sugo ogolaashada maaliyadda. Bukaanka gelinta, VAD, TAH iyo IRP waa in ay maraan baarista hore maaliyadda (ACCESS-FIC-082) ama waa in la ogolaado loona adeegsado Siyaasadda Baddalaadda Gelinta (Transplant Variance Policy) (FN 21). Ogolaashada kaalmada maaliyadda la xariirta adeegyada kale lama kullanto shardigaan.

H. Ogolaasho hore oo laga bixiyo kaalmada maaliyadd laguma dabaqi karo waxyaabaha la xusho mustaqbalka ama hababka qurxinta.

I. Ceymiska Daawada La Qoro: Bukaanka u baahan in laga kaalmeeyo kharashka dawooyinka loo qoray waxay xaq u yeelan karaan mid ka mid ah barnaamijyada kaalmada bukaanka ay bixiyaan shirkadaha farmashiyada. Fadlan la xariir la-talliyaha maaliyadda farmashiyada , telefoonka (402) 559-3469 ama pharmacyfinancialcounselors@nebraskamed.com.

## IV. Sifeynta:

A. Xisaabaadka Guud Ahaan La Soo Dallaco (AGB): Guud ahaan, xisaabta lagu dallaco bukaanka qaba ceymiska caafimaadka xagga degdegga ama daryeelka caafimaad ahaan lagama maarmaaanka ah. Fiiri lifaaqa E si aad u heshid tafaasiil dheeraad ah.

B. Dakhliga Reerka Sannadka: dhamaan dakhliga soo gala reerka kana mid ah balse ku ekeen: mushaarka iyo mushaarka joogtada iyo dakhliga aan mushaarka ahayn kana mid ah taakuleynta xaaska iyo masaruufka cunugga; soshal sekuriti; shaqo la'aanta, manaafacaadka magta shaqaalaha, xaqa, kor saarka ama dakhliga kirada reerka.

C. Arjiga: waxaa loola jeedaa habka dalabka sida hoos timaado Siyaasadaan marka la buuxiyo Arjiga Maaliyadda iyo la bixiyo warqadaha taageersan sida loo baahan yahay.

D. Daryeelka Musiibada: kaalmada maaliyadda la siiyo bukaanka xaqa u yeesho uu dakhligooda sannadka ka badan yahay 400% tilmaanta saboolnimada federaalka iyo waajibka maaliyadda saaran ka badan tahay 25% dakhligooda qoyska sannadka.

E. Daryeelka degdegga ama Daweynta Degdegga: waxaa loola jeedaa daryeelka daweeynta Xaaladda Caafimaadka Degdegga sida ku sifeysan EMTALA. EMTALA waa Sharciga Daweynta Caafimaadka Degdegga iyo Shaqaalaha Firfircoon (Emergency Medical Treatment and Active Labor Act) (42 U.S.C. ss1395dd)

F. Hawsha Aruurinta Aan Caadiga Ahayn (Extraordinary Collection Activity) (ECA): waxaa ka mid ah qaanta; kala wareegidda hantida ma guuraanka; iibka deynta laga iibiyo dhanac kale; warbixinta la siiyo wakaaladaha deynta; xisaabta bangiga ama kala wareegidda hantida qofka; bilaabidda dacwadda madaniga; la wareegidda mushaarka; ammarka maxkamadda ee ku saabsan la wareegidda hantida; gadaal u dhigidda/diidmada daryeelka caafimaadka lagama maarmaanka ah taasoo ugu wacan bixin la'aanta kharashka.

G. Heerka Saboolnimada Federaalka: Tilmaamaha saboolnimada federaalka ay sannad kasta soo daabacdo Dawladda Federaalka.

H. Kaalmada Maaliyadda: dhimista waxaa la siiyaa kuwa muujiya in aysan awood u lahayn in ay bixiyaan.

I. Damiinka: qof ka duwan bukaanka oo mas'uul ka ah bixinta kharashka biilasha caafimaadka bukaanka.

J. Reerka: waxaa ka mid ah bukaanka iyo dhamaan xubnaha kale ee ku nool gudaha reerka. Tani waxaa ka mid ah balse kuma eka xaaska bukaanka iyo dhamaan caruurta (laxmiga ama la korsaday) ee ka yar toban iyo sagaal sanno.

K. Daryeelka Caafimaad Ahaan Lagama Maarmaanka ah: waxaa ka mid ah adeegyada loo baahan yahay baarista iyo daweynta ka-hortagga, xanuunka, daawada, ama fiyoobida xaaladaha takhtarka ama madaxa sida waafaqsan heerarka aqoon ahaan la aqoonsan yahay ee daryeelka caafimaadka guud ahaan la ogol yahay waqtiga la bixiyo adeegyada. Daryeelka caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah kama mid ah hawlaha qurxinta, hawlaha la xusho, ama dawooyinka farmashiyaha tafaraaruqa. Talaalka, VAD, TAH iyo adeegyada IRP waxay u baahan yahiin in si gaar ah looga shaqeeyo.

L. Bukaanka aan ceymis qabin ama loo qabsan karo dhinaca saddaxaad si loo xalliyo qaanta bukaanka.

## V. Tilmaamaha

A. Hawsha Aqoonsiga

1. Nebraska Medicine waxay qabtaa Siyaasad gaar ah si loo suggo u hoggaansamida Daweynta Caafimaadka Degdegga (Emergency Medical Treatment) iyo Sharciga Shaqaalaha Hawsha (Active Labor Act) (EMTALA) (RI 07) iyo gaarka Siyaasadda Asluubta Ururka (Organizational Ethics Policy) (LD 02). Siyaasaddaan Kaalmada Maaliyadda waxay hoos imaan doontaa sharuudaha siyaasadahaas.
2. Financial Counselors, Customer Service Sr. Associates and Collection Sr. Associates waxaa awoodda siiyay Nebraska Medicine, waxayna aqoonsan doonaan bukaanka u baahan baarista hore maaliyadda.

B. Xaqiijinta Xaq u Yeelashada Ceymiska iyo Manaafacaadka

1. Bukaanka wuxuu fullin doonaa xil saarka manaafaacaadka ceymiska isaga/iyada oo mattaleysa isbitaalka.
2. Xaqiijinta xaq u yeelashada, manaafacaadka iyo ilaha bixiyaha waxaa loo samayn doonaa waqtiga loo qabtay sida waafaqsan hababka waaxda Maaliyadda Bukaanka iyo Helitaanka Adeegyada (Patient Finance and Access Services).

C. La-Tallinta Maaliyadda

1. Financial Counselors, Collection Sr. Associate and Customer Service Sr. Associate waxay kaalmeyn doonaan bukaanka u baahan kaalmada maaliyadda.
2. Financial Counselors, Collection Sr. Associates and Customer Service Sr. Associates waxay bukaanka ku kaalmeyn doonaan raadinta lacag celinta barnaamiyada deegaanka, gobolka iyo federaalka marka aysan jirin ilo kale oo ah lacag bixinta iyo kaalmada la siiyo bukaanka soo gudbiyo arjiyada ama qabsada ballamada si ay xaq ugu yeeshaan barnaamijyada dawladda.
3. Bukaanka waxay mas'uul ka yahiin shirarka xiga ee lala yeesho wakaaladda, ee laga yaabo in laga helo ilaha maaliyadda adeegyada daryeelka caafimaadka. Waa la joojin doonaa kaalmada maaliyadda waqti kasta, taasoo ugu wacan in aan loo hooggaansamin waxaan la filaayo.

D. Hawsha Arjiga

1. Arjiyada kaalmada maaliyadda waxaa la dhamaystiri doonaa marka ay caddaato in bukaanka uusan qof ahaan qabin ilo uu kula kulmo mas'uuliyadda lacag bixinta kaddib marka lala kulmo sharuudaha ceymiska ama bixiyaha dhinaca saddaxaad, ama haddii lala kulmo cudur mushiib ah.
2. Hawsha arjiga waxaa la qaban karaa waqti kasta - waxaa la qaban karaa marka hay'adda dalbatoama marka bukaanka codsado. Habka arjiga waxaa ka mid ah dhamaystirka bayaanka maaliyadda qofka. Waxaa loo baahan yahay warqadaha caddeynta. Haddii macluumaadka aan la soo aruurinin ama aan la heli karin, waxaa la samayn doonaa dadaal macquul ah in la xaqiijiyo dakhliga arjiilaha.
3. Kaalmada maaliyadda waxaa la fiirin doonaa waqti kasta inta uu socdo wareegga biilka, ilaa 240 maalin laga bilaabo taariikhda biilka 1[aad].
4. Warqadaha loo baahan yahay waxay ku jiraan Lifaaqa B - Foomka Kashifaadda Maaliyadda.
5. Xaq u yeelashada loo garto - Bukaanka waxay xaq u yeelan karaan kaalmada xattaa hadii aan la dhamaystirin foomamka taasoo ku saleysan habka xaq u yeelasha loo garto kana mid ah: Bukaanka waa guri laawe; Bukaanka waxaa lagu yeeshay deyn lagu xalliyay dacwadaha khasaarada Chapter 7; bukaanka waa shisheeye aan warqado haysanin; bukaanka wuxuu xaq u leeyahay boonada raashinka; ama caddeyn kale oo macquul ah uu bukaanka keeno, iyo ogolaan karo Maamulaha Adeegyada Maaliyadda Bukaanka.
6. Haddii la ogolaado, kaalmada maaliyadda waxay socon doontaa muddo hal sanno laga bilaabo taariikhda ogolaashada, kumana jiraan ceymiska qurxinta iyo hawlaha la xusho. Dhamaan adeegyada gelinta, VAD, TAH iyo IRP waa in ay ogolaashada maaliyadda ka helaa la-talliyaha maaliyadda bacdamaa ogolaashada hore kaalmada maaliyadda aysan la kulmin shardiga sida ku qoran II (E) kor. Haddii ay dhacdo in daruumaha bukaanka isbaddalaan, waxaa dhici karto in dib loo qiimeeyo ogolaashada kaalmada maaliyadda.
7. Bukaanka waxaa lagu ogeysiin doonaa qoraal (lifaaqa C) muddo 30 maalin gudahooda kaddib marka uu soo gudbiyo arji dhamaystiran.
8. Baaqiga hoos yimaada kaalmada maaliyadda waxaa ka mid ah baaqiga iminka ku harray Nebraska Medicine. Haddii bukaanka uu horay bixiyay kharashka kaddibna loo arko in uu xaq u leeyahay kaalmdo, lacag bixinta la sameyay muddada xaq u yeelashada, waa loo soo celin doonaa haddii lacag bixinta ka badan tahay xisaabta laga rabo kaddib marka laga gooyo kaalmada. Lacag celinta waxaa laga shaqeyn doonaa oo keliya haddii ay ka badan tahay $5.00.
9. Arjiyada ku qoran luqadaha kala duwan waxaa laga heli karaa internetka www.nebraskamed.com iyo Helitaanka Bukaanka (Patient Access) ee ku yaal Clarkson Tower ama Xarunta Bukaan Socodka Durham (Durham Outpatient Center) ama Adeegyada Maaliyadda Bukaanka (Patient Financial Services).
10. Si aad u heshid macluumaadka ku saabsan siyaasaddaan kaalmada maaliaydda, kaalmo dhamaystirka iyo gudbinta arjiga, iyo si aad u heshid koobiyada warqadaha siyaasadda kaalmada maaliyadda, soo koobidda luqadda sahlan ee siyaasadda, iyo foomka arjiga, waxaad nala soo xariiri kartaa qof ahaan ama waxaad nagala soo xariiri kartaa telefoonka goobaha iyo nambarada hoos ku qoran:

    Adeegyada Helitaanka Bukaanka - La-Tallinta Maaliyadda
    Nebraska Medical Center
    Clarkson Tower or Durham Outpatient Center
    Omaha, NE 68198-7530
    (402) 559-5346

    Adeegyada Helitaanka Bukaanka - La-Tallinta Maaliyadda
    Bellevue Medical Center
    2500 Bellevue Medical Center Drive
    Bellevue, NE 68123
    (402) 763-3061

    Adeegyada Maaliyadda Bukaanka
    3333 Farnam St., Mutual of Omaha Building, 3[rd] Floor
    Omaha, NE 68131
    (402) 559-3140

E. Khidmadda Jadwalka

1. Tilmaamaha saboolnimada DHHS waxaa loo adeegsan doonaa sida aasaas si loo helo toosinta xisaabta kaalmada maaliyadda la siiyo arjiile kasta. Marka lala kulmo daryeelka musiibada, toosinta waxay ku salesynaan doontaa dakhliga sannadka reerka. Miisaanka Kaalmada Maaliyadda (Lifaaqa A) waxaa loo adeegsan doonaa sida tilmaan si loo aqoonsado xisaabta kaalmada maaliyadda la siiyo lana adeegsado Bayaanka Maaliyadda Qofka (Lifaaqa B) iyo warqadaha taageersan ee lagu dabaqi karo. Dhamaan bukaanka xaqa u yeesha kaalmada maaliyadda, mas'uul kama noqon doonaan in ka badan AGB lagu dallaco bukaanka.
2. Bukaanka dakhliga guud qoyska yahay ama ka hooseeyo 200% heerka saboolnimada federaalka iyo hanti ka yar saddax jeer heerka saboolnimada federaalka waxay xaq u yeelan doonaan daryeel buux oo lacag la'aan ah.
3. Daweynta Nebraska waxay u baahan tahay in si buuxdo loola socodsiiyo xaaladda maaliyadda arjiilaha:
    a) Nebraska Medicine waxay reebaneysaa xaqa ay u leedahay in ay fiiriso hantida qofka sida xisaabaadka wareega, xisaabaadka keydka, maal gelinta "stocks" iyo "bonds" iwm, marka ay gaareyso xaq u yeelashada kaalmada maaliyadda.
    b) Nebraska Medicine waxay reebatay xaqa ay u leedahay in ay sidoo kale fiiriso hantida kale sida guriga qofka, hantida ma guuraanka kale, iyo qiimaha siyaasadaha ceymiska nolosha, maaliyadda "mutual funds",

IRA/maaliyadda Hawlgabnimada, iyo maaliyadda sannadkii lagu darsado xisaabaadka keydka caafimaadka, marka la gaaro go'aanka kaalmada maaliyadda.

F. Haynta Diiwaanka iyo Xisabaabinta Khaaska Kaalmada Maaliyadda
   1. Dhamaan warqadaha maaliyadda ee laga soo aruuriyo arjiileyaasha suurtogalka ah waxaa loo qaadan doonaa in ay yahiin qarsoodi kaddibna waxaa la marrin doonaa skaanka siistem sugan. Waa la burburin doonaa warqadaha asalka.
   2. Waa la ogolaan doonaa xaq u yeelashada arjiile kasta kaddibna waa la amri doonaa sida ku saleysan heerarka hoos lagu sheegay.
      a. 0-50,000 — Maamulaha Helitaanka Bukaanka
      b. 50,001-100,000 — Wareegga Dakhliga Agaasimaha Fullinta
      c. 100,001-500,000 — Sarkaalka Madaxa Maaliyadda
      d. 500,001 and above — Sarkaalka Sare Fullinta

G. Ogeysiinta Bukaanka ee Go'aanka Kaalmada Maaliyadda
   1. Dhamaan ogolaashada/ogolaasho la'aanta kaalmada maaliyadda waxaa arjiile kasta lagu ogeysiin doonaa Lifaaqa C.

**VI. Fikradda Khaaska ah**

A. Gudbinta arjiga lagu soo buuxiyo macluumaad been ah waxay ka saari doontaa bukaanka soo dalbada kaalmada maaliyadda hadba sida uu u garto maamulaha fiirinta.

B. Waxaa dhici karto in ay soo baxaan xaaladaha aan si cayiman loogu halkaas uu qofka xaq u yeelan doono adeeg aan lagu soo dallicin, ama ka yar khidmadda caadi ahaan lagu soo dallaco adeegga la bixiyay, sida tusaalooyinka hoose:
   1. Tani waxaa marmar ka dambeeya musiibada qofka ama shiddada aan leyska ilaalin karin ee soo gaarta qofka laga yaabo in uu iska bixin kari lahaa adeegga, ama qofka qaba dakhli ka badan heerka saboolnimada balse aan weli awoodin in uu bixiyo kharashka adeegga oo idil.
   2. Sida ku saleysan habka aqoonta ee ku xusan qeybaha III D iyo III E kor, guud ahaan bukaanka wuxuu xaq u yaalan karaa daryeelka axsaanka musiibada halka qaanta lagu leeyahay bukaanka ka badan tahay 25% dakhliga soo gala reerka sannadkii.

C. Nebraska Medicine waxay reeban doontaa awood buuxda ay ku gaarto xaq u yeelashada qofka xagga sadaqada.

**VII. Go'aanka Kaalmada Maaliyadda Ka Hor Inta Aan Talaabo Laga Qaadin Lacag Bixin La'aanta.**

Mabda' Hoggaaminta: Nebraska Medicine waxay baaqiga bukaanka ugu shaqeyn doontaa hab iswaafaqsan sida ku saleysan shaciga ugu dambeeyo 501 (r) ee IRS iyo Maaliyadda. Bukaanka iyo/ama bixiyeyaasha waxaa lagu soo dallici doonaa kharashka waqti ku habboon iyo shaqaalaha waxay ku shaqeyn doonaan heerar xagga adeegga macaamilka, taasoo taageersan ahamiyadda Nebraska Medicine siiso Waxa Bukaanka la Kulmo (Patient Experience). Adeegyada Maaliyadda Bukaanka ee Nebraska Medicine waxaa loo ruqseyay ayna mas'uul ka tahay in ay ogaato haddii la sameyay dadaal macquul ah si loo qiimeeyo xaq u yeelashada bukaanka xagga kaalmada ka hor inta aan la bilaabin hawsha aruurinta aan caadiga ahayn.

A. Dhaqanka Biilasha iyo Dadadaalka Macquulka ah: Nebraska Medicine waxay rabtaa in ay ogaato in bukaanka xaq u leeyahay kaalmada maaliyadda ka hor inta aan la bixinin ama marka la bixiyo adeegga. Haddii bukaanka aan loo arkin in uu xaq u leeyahay ka hor inta aan la fasaxin ama adeegga, Nebraska Medicine waxay soo dallici doontaa daryeelka. Haddii bukaanka uu qabo ceymis, Nebraska Medicine waxay kharashka la gallay ku dallici doontaa ceymiyaha bukaanka ee ku jira diiwaanka. Kaddib marka uu ka shaqeeyo ceymiyaha bukaanka, kharashka ku harray bukaanka waxaa si toos ah loogu dallici doonaa bukaanka ama damiinka. Haddii bukaanka uusan ceymis qabin, bukaanka wuxuu heli doonaa dhimista qofka iska bixiyo iyo baaqiga harray waxaa si toos ah loogu dallici doonaa bukaanka ama damiinka. Bukaanka ama damiinka bukaanka ee lagu leeyahay baaqiga wuxuu heli doonaa taxane ilaa afar bayaan muddo 120 maalin laga bilaabo kaddib marka adeegyada la siiyo. Bayaanada biilasha bukaanka waxaa la geyn doonaa cinwaanka ku jira faylka. In la bixiyo macluumaadka cinwaanka oo sax ah waxaa mas'uul ka ah bukaanka iyo/ama damiinka bukaanka. Nebraska Medicine waxay si firfircoon u raadsan doontaa in ay aqoonsato bukaanka xaqa u yeesha kaalmada maaliyadda waxayna u adeegsan doontaa dadaal macquul ah sida: ogeysiiska bukaanka ama damiinka laga siiyo siyaasadda marka bukaanka soo galo, qaabka qoran ee la raaciyo bayaanka biilka, afka lagala xariiro bukaanka lagala hadlo biilka bukaanka iyo baaqiga harray, iyo qaabka qoran sida "Waan Ku Kaalmeyn Karnaa" iyo buugaagta laga helo meelaha Helitaanka Bukaanka iyo Waaxda Degdegga, iyo sida qoraalka macluumaadka ku saabsan bayaanada biilka bukaanka, iyo jawaabta qoran ee loo diro gudbinta Arjiga Maaliyadda muddo 240 maalin gudahooda laga bilaabo bayaanka biilka kowaad lana xariira baaqiga aan la bixinin. Kaddib marka la codsado, waxaa la heli karaa koobiyada warqadaha Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda (Financial Assistance Policy), Arjiga iyo Soo Koobidda Kaalmada Maaliyadda (Application and Financial Assistance Summary), waxaana laguugu soo diri karaa boostada, internetka, ama meelaha Waaxda Helitaanka Bukaanka iyo Degdegga (Patient Access and Emergency Department). Xariirka telefoonka ee lala sameeyo bukaanka ama damiinka waxaa leysku dayi doonaa ugu yaraan hal mar, mana ka yaraan doonto 30 maalin ka hor inta aan la bilaabin hawlaha aruurinta aan caadiga ahayn.

B. Dhaqamada Soo Aruurinta: Nebraska Medicine waxay ku dhaqaaqi kartaa hawalaha aruurinta - kana mid ah Hawlaha Aruurinta Aan Caadiga Ahayn (Extraordinary Collection Activities) (ECA's) marka ay u hoggaaansan yahiin sharciyada munaasabka ah ee gobolka iyo federaalka. Haddii bukaanka lagu leeyahay baaqi muddo 120 maalin loona dirray ugu yaraan afar bayaan oo ku

saabsan biilasha, baaqiga ku harray bukaanka waxaa loo diri doonaa wakaaladda aruurinta si loo daba galo lacag bixinta loona mattalo Nebraska Medicine. Haddii arjiga kaalmada maaliyadda la helo muddo 240 maalin gudahooda laga bilaabo bayaanka kowaad ee bukaanka, ECA kasta oo socda wuu istaagi doonaa kaddibna waxaa la fiirin doonaa haddii arjiga la ogolaan karo. Sida hoos timaada daruufaha caadiga, wakaaladaha aruurinta Nebraska Medicine ma siiyaan warbixin xafiisyada deynta iyo ma daba galaan la wareegidda mushaarka ama falalka aruurinta la midka ah. Wakaaladaha aruurinta ee mattala Nebraska Medicine waxay awood u leeyahiin in ay daba galaan aruurinta ilaa 18 bil laga bilaabo marka hore ee lagu wareejiyo wakaaladda. Bukaanka wuxuu dalban karaa kaalmada maaliyadda hoos timaado Siyaasaddaan xattaa kaddib marka baaqiga aan la bixinin ee bukaanka loo dirray wakaaladda aruurinta ilaa 240 maalin. Kaddib marka ay soo gudubto ugu yaraan 120 maalin laga bilaabo bayaanka biilka ka dambeeyo ka-bixidda ee muujiya kharashka aan weli la bixinin, iyo sida waafaqsan kiis-ilaa-kiis, Nebraska Medicine ama wakaaldda aruurinta ee mattasha Nebraska Medicine, waxay daba geli kartaa aruurinta loo maro dacwad marka bukaanka ku hartay baaqi aan la bixinin lana shaqeynin codsiyada lagu dalbado macluumaad ama lacag bixinta Nebraska Medicine ama wakaaladda aruurinta iyada mattasha.

C. Bukaanka lagu leeyahay baaqiga weli lagu harray looma diidi doono daryeelka caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah; hase ahatee, waxaa la qaadi doontaa talaabooyin lagu soo aruuriyo dhamaan biilashii hore iyo kuwa cusub ee bukaanka.

## VIII. Bixiyeyaasha u Qalama

Adeegyada ay bixiyaan takhaatiirta u shaqeeyo Daweynta Nebraska waxaa qaataan ceymiska hoos yimaada siyaasadaan. Bixiyeyaasha ku jira ceymiska iyo waxa ay ku takhasuseen waxay ku qoran yahiin Lifaaqa G.

Adeegyada ay bixiyaan takhaatiirta sida gaarka u shaqeeyo, aan ka tirsaneyn shaqaalaha Nebraska Medicine, ma hoos yimaadaan siyaasadaan. Bixiyeyaasha **aan** ku jirin sida hoos timaado siyaasadaan waxay ku qoran yahiin Lifaaqa H.

Liisaska bixiyaha waxaa la casriyeyn doonaa kwartarkii hal mar.

## IX. Sharuudaha Sharciga/Tixraacyada:

Siyaasaddaan waxay u hoggaansan tahay Xeerka Dakhliga Gudaha Qeybta 501 (r) iyo Sharciyada Maalka ee la xariira (Internal Revenue Code Section 501 (r) and related Treasury Regulations).

## X. Siyaasadaha la Xariira:

FN13 – Siyaasadda Qiimeynta Baahida Maaliyadda
FN14 – Aruurinta Lacagta Caddaanka
FN16 – Siyaasadda Dhimista
FN17 – Siyaasadda Lacag Bixinta Bukaanka
FN21 – Codsiga Baddalaadda - Talaalka
LD02 - Xeerka Asluubta Ururka
RI07 - Siyaasadda Daweynta Caafimaadka Dedegga iyo Wareejinta
SOTFIDP1002 – Qiimeynta Maaliyadda - Talaalka

La Xisaabtanka Shaqaalaha
Maamulaha Helitaanka Bukaanka - La-Tallinta Maaliyadda - Ogolaashada/Fiirinta Sannadka
Maamulaha Helitaanka Bukaanka - La-Tallinta Maaliyadda - Ogolaashada/Fiirinta Sannadka
Wareegga Dakhliga Agaasimaha Fulinta - Ogolaashada
Sarkaalka Sare Maaliyadda - Ogolaashada
Sarkaalka Sare Fullinta - Ogolaashada
Guddiga Agaasimeyaasha Daawada Nebraska - Ogolaashada

Lifaaqa A - Miisaanka Sadaqada
Lifaaqa B - Foomka Kashifaadda Maaliyadda
Lifaaqa C - Warqadda Go'aanka
Lifaaqa D - Warqadda Codsiga Macluumaadka
Lifaaqa E - Xisaabaadka Guud Ahaan La Soo Dallaco
Lifaaqa F - Ku Soo Koobidda Luqad Sahlan

| **Ogolaashada Waaxda** | | **Ogolaashada Maamulka** | |
|---|---|---|---|
| Saxiixa \| Saxiixeyaaha \|: | Jana Danielson | Saxiixa \| Saxiixeyaaha \|: | Stephanie Daubert |
| Magaca: | Agaasimaha Fullinta | Magaca: | Chief Financial Officer |
| Waaxda: | Wareegga Dakhliga | | |